

U fiirsashada calaamadaha gaajada ayaa u diyaariya ilmahaaga xiriir caafimaad leh in uu la yeesho cuntada inta uu nool yahay.

- Hubso in ilmahaagu ku raaxaysanayo oo ka xaddid carqaladaha markuu wax cunayo.
- Diirada-saar inaad jacayl u muujiso waqtiga quudinta.
- La soco calamadaha gaajada ama dharagta ee ilmahaaga.
- Jooji quudinta ilmahaaga isla marka aad ogaato calaamad dharag.

CALAAMADAHGA GAAJADA



Marka ilmahaagu cabbayo caanaha hooyada ama caano booraha carruurta 4-ta bilood ee ugu horeeysa, la soco:

- Suul nuugista ama gacan nuugista.
- Dhaqdhaqaaqinta afka ama carab nuugista (in dhallaankaagu u jeedsanayo dhanka cuntadu ka jirto).
- Fuuqdhabiilid/dejin la'aan.



Marka ilmahaagu cunayo cuntooyinka adag, la soco:


- U janjeerida dhanka cuntada iyo kala qaadida afkiisa.
- Ku farxida markuu cunto arko.
- Jaleecida iyo eegida cuntada.

CALAAMADAHGA DHEREGTA



Marka ilmuhu cabbayo caanaha hooyada ama caano booraha carruurta, la soco:

- Ka jeedsashada cuntada.
- Isku qabashada afka.
- Kala bixinta gacmahooda iyo lugahooda.
- Dib isku jafaalinta.



Marka ilmahaagu cunayo cuntooyinka adag, la soco:

- Tufida ama iska soo riixida cuntada.
- Isnuuxnuuxinta ama fiirinta sheeyaasha kale.
- Isku qabashada afka marka cunto la siin rabo.
- Leexinta madaxa marka cunto la siin rabo.
- Ku ciyaarida cuntada la siiyo.